# Shakhsiyaadka iyo Qoysaska

## Goorma ayey bilaabanayaan Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka ee Mushaarka Lagu Qaato?

Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka ee Mushaarka Lagu Qaato waxay Minnesota ka bilaaban doonaan 1da Jannaayo, 2026.

## Maxaan sameynayaa si aan u helo Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka ee Mushaarka Lagu Qaato?

- Waa in aad ogeysiiso shaqa-bixiyaha ugu yaraan 30 maalmood ka hor intaadan fasaxa qaadan markaad sii ogtahay dhibka ku haysta.
- Waa in uu dhibka ku haysta noqdo mid aad xaq ugu yeelan karto ugu yaraan toddoba maalmood. (Dhibka fasaxa lagu heli karo waa inuu ahaado mid aad xaq ugu yeelan karto mid ka mid ah noocyada fasaxa ee (**Family Leave (Fasaxa Qoyska)** si aad u daryeesho qof qoyska ka mid ah oo ku jira xaalad caafimaad oo daran, ama haddii aad tahay waalid ilmo u dhashay ama markay ilmo qoyskaaga ku soo biiraan **Medical Leave (Fasaxa Qoyska)** marka ay xaalad caafimaad oo daran kaa horjoogsaneyso in aad shaqeyso.) – tusaale ahaan, marka lagaa helo xaalad caafimaad oo daran.) Waxaan diyaarineynaa liis ah waxyaabaha nolosha lagula kulmi karo ee xaqa loogu yeelan karo oo barta intarnetka ayaan ku soo qoreynaa marka ay soo dhawaato taariikhda la bilaabayo barnaamijka.
- Si laguu fasaxo waa inaad codsato Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka ee Mushaarka Lagu Qaato. Xirfadle caafimaad ama qof qoyskaaga ka mid ah ayaa caddeyn kara sababta aad fasaxa u qaadaneyso.

## Yaa xaq u yeelan kara Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka ee Mushaarka Lagu Qaato?

Badanaa shaqaalaha Minnesota waxay xaq u yeelan karaan fasaxa mushaarka ah ka dib marka ay ku shaqeystaan lacag ka badan $3,500 gobolka gudihiisa muddo ah ilaa hal sano.

## Mushaar Intee le’eg ayaa la i siin doonaa?

Lacagta Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka ee Mushaarka Lagu Qaato waxay ku xiran tahay mushaarka aad qaadato toddobaad kasta. Marka ay soo dhawaato taariikhda la bilaabayo barnaamijka, waxaan barta intarnetka ku soo dareynaa mashiin ah xisaabiye si uu qof kasta uga heli karo qiyaastiisa mushaarka fasaxa.

## Yaa i siin doona lacagta Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka ee Mushaarka Lagu Qaato?

Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka ee Mushaarka Lagu Qaato lacagtiisa waxaa bixinaya Gobolka Minnesota.

## Intee in le'eg ayaan anigu bixin doonaa?

Shaqaalaha Minnesota ayaa ceymis ahaan mushaarkooda lacag yar si toos ah looga soo gooyaa lacagta Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka ee Mushaarka Lagu Qaato oo waxa ay qeyb ka tahay lacagaha la iska gooyo. Waxaad bixin doontaa wax aan ka badneyn 0.35% oo ka mid ah mushaarka lagaa canshuuro, balse shaqa-bixiyaha ayaa kaa bixin kara lacagtaas yar ee ah ceymiska. Ma jirto wax aad adigu sameyneyso oo lagaa rabo.

## Goormaa la bilaabayaa in la iska gooyo lacagta ceymiska fasaxa caafimaadka?

Lacagta ceymiska Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka ee Mushaarka Lagu Qaato lama bilaabi karo in la iska gooyo ilaa la gaaro 1da Jannaayo, 2026.

## Immisa fasax ayaa la qaadan karaa?

Sannad kasta oo cusub, fasax ayaad qaadan kartaa:

- Halkii mar 12 toddobaad oo ah fasax caafimaad ama fasax qoys ayaad xaq u yeelan kartaa.
- Haddii aad marar badan xaq u yeelato ilaa 20 toddobaad oo ah fasax caafimaad iyo mid qoys oo la isku geeyey hal mar inta lagu jiro hal sano gudihiis. Waxaa ka mid noqon kara fasaxa caafimaadka ee uurka ama si looga soo kabsado marka la umulo ka dib, ka dibna fasaxa qoyska oo ah in ilmaha dhashay xoogaa la soo kobciyo. Ama waxaad xaq u yeelan kartaa fasaxa qoyska si aad u daryeesho qof ka mid ah qoyskaaga, ka dibna fasaxa caafimaadka ee naftaada isla sannadkaas gudihiisa.

## Ma khasab baa in aan hal mar wada qaato fasaxyadeyda oo dhan?

Maya, uma baahnid in aad hal mar wada qaadato Fasaxa Lacagta ah. Laakiin markaad fasax dalbato, waa in aad ka dhigato maalin kasta (siddeed-saac) oo xiriir ah. Tusaale ahaan, waxaad qaadan kartaa hal maalin oo fasax ah toddobaadiiba si aad u daryeesho qof ka mid ah qoyskaaga oo soo qaadanaya daawada kansarka ee ah kiimikada. Ama waxaad qaadan kartaa fasax ah toddobaadyo buuxa si aad uga soo kabsato qalliin weyn.

## Ma sii haysanayaa shaqadeyda markaan qaato Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka ee Mushaarka Lagu Qaato?

Haa. Sharciga Minnesota ayaa difaacaya Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka ee Mushaarka Lagu Qaato oo ma dhacayso in marka xaq loo yeesho fasaxaas lagu waayo shaqada. Sharcigu waxa kale oo uu difaacayaa in shaqaalaha laga aargoosto.

## Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka ee Mushaarka Lagu Qaato ma wuxuu la mid yahay FMLA?

Maya. Fasaxa Qoyska iyo Fasaxa Caafimaadka ee Mushaarka Lagu Qaato waa barnaamij fasax ah oo mushaar lagu qaato oo ay masuul ka yihiin maamulka Gobolka Minnesota. FMLA (waa Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka ee dawlada dhexe oo ah mid sharci ah oo jiray ilaa 1993) balse waa mid aan mushaar lagu qaadan, laakiin shaqada ayaa qofka loo difaacayaa.

## Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka ee Mushaarka Lagu Qaato ma wuxuu la mid yahay Fasaxa Maalmaha Xanuunka iyo Saacadaha Keydsan ee Shaqaalaha?

Maya. Sharciga cusub ee Minnesota ee maalmaha xanuunka iyo saacadaha keydsan waa mid shaqa-bixiyuhu ogyahay si ay shaqaaluhu ugu urursadaan fasax alacag ah marka ay ku dhacaan jirro yar ama khatar kale. Faahfaahinta maalmaha jirrada iyo saacadaha keydsan ka eego Waaxda Shaqada iyo Suuqyada Meheradaha [insert link].